

WAXBARASHADA BILAASHKA AH EE KULLIYADDU WAXAY U SAHLAYSAA DAD BADAN OO REER MINNESOTA AH INAY KULLIYAD DHIGTAAN.

Taasi waa ballanqaadka North Star Promise.

North Star Promise (NSP) waxaa loo sameeyay in lagu bixiyo waxbarasho lacag-la'aan ah, si arday iyo qoysas badan oo reer Minnesota ah ay fursad ugu helaan waxbarashada dugsiga sare ka dib.

Qaado shahaado jaamacadeed. Qaado shahaado xirfadeed. Baro xirfa.

Dhammaan machadyada waxbarashada sare ee dadweynaha ee Minnesota iyo Kulliyadaha Qabiillada (Tribal Colleges) waxay uqalmaan waxbarashada lacag-la'aanta ah ee loo marayo NSP. Waxbarashada lacag-la'aanta ah waxaa laga heli karaa:

- Dhammaan Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota
- Dhammaan xarumaha Jaamacadda Minnesota
- Dhammaan Kulliyadaha Qabiillada

NSP wuxuu u furan yahay dhammaan ardayda deggan Minnesota ee dakhliga guud ee qoyska ee la hagaajiyay (AGI) oo uu ka yar yahay \$80,000, sida lagu soo sheegay Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dhaqaale ee Ardayda Federaalka (FAFSA) ama Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka Minnesota ee Beddelka ah.

Dhigasho kulliyad khasab ma aha inay la macno noqoto inaad gasho deyn aad u badan.

Sii wadashada waxbarashadaada waxay kaa caawin kartaa inaad nolosha horumar dheeraad ah ka gaarto oo aad wax badan qabato, gaar ahaan adigoo culayska deynta dib kuu dhigin. NSP wuxuu daboolaa ilaa 100% kharashka waxbarashadaada iyo khidmadaha lagaa rabo, wuxuuna kaa caawinayaa inaad hesho waxbarashada aad rabto adigoo gelin deyn aad u badan. Qaddarka saxda ah ee maalgelinta aad heli karto waxaa lagu xisaabiyaa habka “last-dollar”, taas oo macnaheedu yahay in NSP uu daboolayo kharashka waxbarashada iyo khidmadaha ee kuu hadhay ka dib marka lagu qoondeeyo dhammaan kaalmooyinka kale (sida deeqaha waxbarasho, deeqaha dhaqaale, gunnooyinka, iyo ka-dhaaftaannada kharashka waxbarashada). Deymaha dayda iyo barnaamijyada shaqowaxbarasho laguma xisaabiyo inay yareeyaan qaddarka maalgelinta aad heli karto. NSP ma daboolo kharashyada sida hoyga, cuntada, gaadiidka, buugaagta iyo agabka waxbarashada.

WAXBARASHADA LACAG-LA'AANTA AH WAXAY KAA CAAWINAYSAA NAAD XBARASHADAADA U SII WADATO SIDA ADIGA KUGU HABBOON.

- Waxaad wadan kartaa barnaamij shahaado afar sano ah ama laba sano ah, waxaad baran kartaa xirfad, ama waxaad heli kartaa shahaado xirfadeed
- NSP kuma koobna barnaamij ama takhasus gaar ah
- Kaalmada lama kala hormariyo iyadoo lagu salaynayo maaddooyin, xirfado ama shahaadooyin gaar ah
- Fasallada waqti-dhiman iyo kuwa fiidkii ayaa ku jira
- Si aad ugu qalanto, iska diiwaangeli oo qaado ugu yaraan hal dhibic waxbarasho (credit)
- Barnaamijka wuxuu u furan yahay ardayda cusub iyo kuwa waxbarashada ku soo laabanaya ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka.



Sida loo codsado waxbarashada lacag-la'aanta ah ee North Star Promise.

Si aad u codsato maalgelinta NSP, buuxi FAFSA ama Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka Minnesota ee Beddelka ah ka hor wakhtiga kama dambaysta ah (fadlan ka eeg bogga internetka macluumaadka ugu dambeeyay). Codsiga waxaa lagaa doonayaa inaad ku qorto machadyada waxbarashada ee aad qorshaynayso inaad dhigato si aad u hesho shahaadada jaamacadeed ama shahaadada xirfadeed. Haddii adiga iyo qoyskaagu aad u qalantaan, isla markaana aad dhigato kulliyad ama jaamacad u qalanta barnaamijka, machadkaaga waxbarashadu wuxuu ku siin doonaa waxbarashada iyo khidmadaha lacag-la'aanta ah taas oo qayb ka ah kaalmada dhaqaale ee lagu fidiyo.

Shuruudda keliya ee waxbarashada ee lagaa rabo waa inaad buuxiso heerarka SAP ee dugsigaaga, taas oo macnaheeda yahay inaad ku sii socoto waddadii aad ku heli lahayd shahaadada ama aqoonsiga xirfadeed ee aad hiigsanayso. Haddii aad dhigato barnaamij laba sano ah, waxaad heli kartaa NSP ilaa afar semester oo waqti-buuxa ah ama wax u dhigma. Haddii aad dhigato barnaamij afar sano ah, waxaad heli kartaa NSP ilaa siddeed semester oo waqti-buuxa ah ama wax u dhigma. Semester waqti-buuxa ah waa inaad iska diiwaangeliso 15 ama ka badan oo dhibco waxbarasho ah. Ardayda iska diiwaangelisa wax ka yar 15 dhibcod semesterkiiba, muddada ay barnaamijka ka faa'iidayaan karaan waxaa loo xisaabin doonaa si saamigal ah iyadoo lagu salaynayo tirada dhibcaha ay iska diiwaangeliyeen.

Shuruudaha U-qalmitaanka oo Dhammaystiran

- ✓ Shuruudaha U-qalmitaanka oo Dhammaystiran.
- ✓ Dakhlaga Guud ee Qoyska ee La Hagaajiyay (AGI) waa inuu ka yar yahay \$80,000.
- ✓ Waa in lagaa aqbalay ama aad dhigataa machad waxbarasho sare oo dadweyne oo Minnesota ku yaal ama Kulliyad Qabiil.
- ✓ Waa inaad iska diiwaangelisaa oo aad qaadataa ugu yaraan hal dhibic waxbarasho (credit).
- ✓ Waa inaad iska diiwaangelisaa barnaamij ama koorso waxbarasho oo lagu kasbanayo shahaado jaamacadeed, diblooma, ama shahaado xirfadeed.
- ✓ Waa inaad buuxisaa heerarka Horumarka Waxbarasho ee Lagu Qanco (SAP) ee dugsigaaga.
- ✓ Waa inaad hore u qaadan shahaadada koowaad ee jaamacadda, oo ay ku jiraan shahaadooyinka laga qaatay waddan shisheeye.
- ✓ Waa inaad ku jirin xaalad bixin-la'aan ah oo la xiriirta deyn arday oo gobol ama federaal ah.
- ✓ Waa inaad codsiga ku gudbisaa ka hor wakhtiga kama dambaysta ah.

WAQTIGA KAMA DAMBAYSTA EE MUDNAANTA LEH

Sannad-dugsiyeedka 2026–27, Xafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota wuxuu 1 Juun, 2026 u asteeyay waqtiga kama dambaysta ah ee mudnaanta leh, si ardayda u qalanta ay u codsadaan kaalmada dhaqaale looguna tixgeliyo deeqda waxbarasho ee North Star Promise (NSP). Inkasta oo aan weli go'aan laga gaarin in waqti kama dambays ah oo mudnaan leh loo dejin doono sannad-dugsiyeedka 2027–28, ardayda u qalanta waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay sida ugu dhakhsaha badan u buuxiyaan FAFSA ama Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka Minnesota ee Beddelka ah, si loo hubiyo in si buuxda loogu tixgeliyo kaalmada dhaqaale.FAFSA iyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka Minnesota ee Beddelka ah labaduba waxay furmayaan Oktoobar 1, 2026, sannad-dugsiyeedka 2027–28.

KULLIYADAHA IYO JAAMACADAHA UQALMA

MINNESOTA STATE COLLEGES AND UNIVERSITIES
www.minnstate.edu

UNIVERSITY OF MINNESOTA CAMPUSES
www.system.umn.edu

TRIBAL COLLEGES:

Fond du Lac Tribal and Community College
www.fdlccc.edu

Leech Lake Tribal College
www.lltc.edu

Red Lake Nation College
www.rlnc.edu

White Earth Tribal and Community College
www.wetcc.edu

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH:

ohe.mn.gov/northstarpromise
NorthStarPromise.OHE@state.mn.us